



HOGHOL

Dooqaadky Af Soomaaligy - Maayky - HOGHOL Soomaali Maay Newsletter
| Bil'ly - Monthly |

Walaal Tirooduung ki jero

- Taariikdy Jamaa'atha Baardheere (1-2)
- Doodhis (maghy ing surung) (2-4)
- Magmaag (4)
- Dhaghanky (5)
- Manaahijta walbarashoohy Dowladda Federaalky (5)
- Wargiling (5)

Tifaftiry: Abdullahi Sheikh Mahamad

Aasaasy - Founder

Goobty Horumariyoky Afky Maayka (Afmaay Development Center), maay la aasaasy sanadky 2017. Sababty liing aasaasy maaybuwaaha horumariyowky afky ii dhaganky Maayky (Af-Soomaalighy Maayky).

Maay ha dhawaayaanee dhammang dadky ky howlling horumariyowky afky-aayow, Af-Maay.

Abdulkadir Abukar Sheikh, Founder Af Maay Development Center (ADC)

Email:

afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Facebook: <https://www.facebook.com/afmaaydevelopment/>

Office: Baidoa, Sheekh , S/Land, Muqdishu i i Örebro, Sweden.




Taariikdy Jamaa'athy Baardheere: Qeebtii 6aad Baardheere Historia=Baardheere History

Markii Lity firqi jamee'atha li suubiyyi wey eed ing fufuthuthaateey is-maamulky amuro jamee'ada. Wakiilithii firqiyaa wey naghatheeny hiriiriyeyaal ulul-amrighy i firqiyaa kaly. Fithowky i habeenty maamulky Jamee'atha baardheere eed iya liingky dhuroowi.

Hillighii Sheek Abukur Aly dhurry Jameeada weyba deerteey ilaa webighy shabeele oo dhoobooy eh. Dhinnighy kaleny ilaa Luuq i Eelwaaq iyoogo faafiyaayang diing, sammaangny lis farow. Ku reed weybaa li go'aangsitheey iniidiing fithiyoowky jameeada li dersiyi Baay, Bakool i Harqaang.

Sheeqy wey ky taliyeey ing degaangky usu ku kooyi liky billaawo fithinty diinty, taas oo dareeng wiing luku qopi. Iyeetho li wetho dathaalkaas iyee may jameeada haly deriseey dhib ungu kooyi degaamy eed ungy dheer baardhere oo saameyng wiing ki weeldhithi.



Deghaanky Moolimaad meel ky tirsing oo li erraaw Ombile iyee Sheek Abukur dhurry i hir bathang ilaa 200 qof eh seetheeng, wayny li seedeng samaang badang. Dadky rer Ombile muslimiming iyee haayeyng laaking aathithii kaleny isku jereng.

Hogaanky reer Oomile eetha ing dhibsitheeng rooghooowky Sheek Abukur dhurry. Way likily taliyeey in usu isku baha oo deghaansho ungu tapo. Talathaas Sheek Abukur i hirtiis diitheng, taas may sheentey ing liing talythy oo duulaang wiing qabiily meely badang luku sheeny iyee ku qeebqaaditheeng. Arringtuung wey liing kaseey "fidnithii Oombile". Weybaa qobsotheey daghaal iyo diyaar ingy haayny. Sheek Abuukar iyo qeeb ku mid eh ulumaathii li jertii oo deerasy ilaa 100 qof meelaasaa liky dili, iyeethoo ety waqti maqrab ly tukuthaaw. Dadkii haku heri way ing naghatheeeny Baardheere.

Sheikh Abdirahman Abaayle (7 Sanno, 1828 - 1835)

Dhipaatithii Ombile i dhimishidy Sheeqy ku reed way ulul-amrighy Jamee'atha liing doorithey Sheek Abdirahmang Apaayle. Waybaa haky toostey waqty Jameeada kistoo nuglaati oo athowshee bathaithi. Adowghaas oo ing bathanaayi qapiily i saldaniyaal. Qapiilee ii Saldaniyaalky may ing aragheeny ing Jamee'atha hor surungty geddiiskii i gannaatii gopolee ku jereeng sithy Tubaakitha, fool-maroodighy iyo batheeyaa iyo sheengdhithaayeeng IWLM.

Sidaas dartiyee, Sheek Abdiramaan Apaayle ming suury galny ini maamulka Baardhere fithiyoo billeeriyoiyo. Waybaany ing guureey deghaangky liing kasow Mansuur oo buuly wiing oo Baardhere ing dhow eh. Mansuur iye awaamirty diinty iyo hooloo kaly sithy atheeggy jamee'atha haky faraayi. Sheek Abdiraman marky usu deganaayi Mansuur ing muddy eh iyee Jamee'atha dhib kaly oo wiing haly derisi. Taas oo eh isbaheeysi qapiilly bathang i Saldaniyaal haky duuli. Ly dareer qaybty 7aad

Diaariying: Omar Abdulqaadir Sh. Abdirahman

Qeepoo Dooghy: Qiib ku mid eh Doodhisky Afky Maayky (En del av Somaliska Maay Grammatik/Part of Somali Maay Grammar)

Maghy insurung/Maghy ingyaal (Pronomen/ Pronouns) Weely/Laweely – Subjekt/Objekt form

Afky maayky sithy afafky kale may leyaa maghy insurung (pronomen) oo ku qiib qaathithaaw dhismeethy doodhisky (grammatik) afky Maayky. Way isky deyeey inii isbarbardhikoow ky suubiyo lahjathoo Afky Soomaalighy Maay i Maxaa, iyo luqadoo kaly ee Iswidishky i Ingiriisky.

Maghy insurangky afky Maayky way ing shal baheey lamy qiibood, weely (Subjekt/subject) i luweely, (objekt/object). May kaloo jeree maghy ing yaaly dheer i hanoo gaabing oo Af Somaalighy Maay i Maxaaby leyiing, inkastoo kang Maayky ing baahinyi baaritaang dheer. Shabaqy/shaxda hoose may isky barbardhikeey maghy ing yaalee Af Soomaalighy (Maay i Maxaa), Swidish iyo Ingriis.

Soomaali Maay Maghy ing surang/Mag y ingyaal Pronomen/Pronouns		Maghy ingsurung (Weely) Pronomen/pronouns – subjekt/subject-Swedish/English	Somali Maay Maghy ingsurun (Luweely-objekt)	Somali Maxaa (Magac uyaal) (lång och kort form)	Somali Maxaa Magac uyaal Layeele (objekt)	Magheingsurang/Magheinyaal – Laweely Pronomen objekt/pronouns object Swedish/English.
1 sg.	Any	jag/I	i	anigu/aan	i	mig - me
2 sg.	Athy	du/you	ki	adigu/aad	ku	dig - you
3 sg. m.	usy	han/he	-	isagu,asagu/uu	-	honom – him
3 sg. f.	iye/iyee	hon/she	-	iyadu,ayadu/ay	-	henne – her
1 pl. exkl. (muku tirsing)	uni/uny	vi/we	ni	annagu/aan, aannu	na	oss - us
1 pl ink. (ku tirsinyi)	-	-	-	innagu/aynu	ina	-
2 pl.	ising	ni/you	siing	idinku/aad, aydin	idin	er – you
3 pl.	haang/iyo	de/they		iyagu,ayagu/ay	-	dem(dom)-them
Maghy inyaalky shey/shaksi – Personalig promemen – ArtiklenSomaliska Maay/Maxaa prespektiv						
qof/shey m. person/sak/thing	kang	den/det/ - it		kan		den – it
shey/qof f.	tang	den/det - it		tan		den – it
wadar/plural	haang/iyo	de - they		Kuwaan		dem(dom) – them

FG. sg= singular, m= male (lab), f= female (dheddig), pl= plural (jama’wadar).

1 pl. exkl. (muku tirsing i ku tirsinyi) qofka seddhaad wadarty oo hathalaaw inii ku tirsiny i inii ungku tirsinaayne mathoo bershoo Maxaa tirigileey ing gaar eyi. Maayky mar kasty ku tirsiny

Tusaaly: Maghy ingsurung weely – Pronomen/pronouns subject form.

Any/Ani maay aamahaayee hunguri. - **Anigu** waxaan cunayaa cunto. - **Jag** äter mat. – **I** am eating food.

Athy/Athi may dheelahaaytee baloonighy lugty. – **Adigu** waxaan ciyaareysaa kubadda cagta. **Du** spelar fotboll. - **You** are playing soccer.

Usy/Usi way ing so’otee Daafeed - **Isagu** wuxuu u socdaa Daafeed. - **Han** åker till Daafeed. He is going to Daafeed.

Iye way kariyaahaaytee ashy. - **Iyadu** waxay karineysaa casho. - **Hon** lagar middag. - **She** is cooking dinner.

Kang wal suurud le’wu. - **Kan** waa wax qurux badan . - **Den** är en vacker sak. **It** is a beautiful thing.

Uny/Uni wangaa dhamahaayne. – **Annagu** waxaan cabeynaa/dhammeynaa caano. - Vi dricker mjölk. - **We** are drinking milk.

Ising way fiirsithaahaaytaane filing - **Idinku** waxaad fiirsaneysaan filin. - **Ni** titer på en film. - **You** are watching a film

Iyo mo kooyne shirky. - **Iyagu** ma imaan shirka - **De** kom inte mötet - **They** did not come the meeting.

Raad Rah/Raad Raac/Reference/Referrals: Nilsson, M. (2018) – Somaliska - En Kontrastiv Grammatik för Modersmålstalare Göteborgs Universitet – Institutionen för språk och litteraturer - Sweden.

Diyaaring: Abdulkadir Abukar Sheikh, Afmaay Development Center/Örebro Sweden.

Magmaag (Ordspråk): Baathi ii langshe aragti ing dhaheyte:

Magmaagduung maaybaa sheeghaasee wal dhumi ama la hatheey li booliyi ii qofkii horaang lahaayi maayleey in dhohooytee aragti. Hooba qofkii lahaayi aragho qobsothee walaaghuung anii leh yee arree. May ha galee walaa baathi naghatha koro? Dad (ariir ii miir laawy dhumeeng), hooly (gaal, loo, ereng ii dameer), handhy kale sithy deheb, qalang ii aghal kale sitha Osby, ul, hangool, yeembe, misaar, moo, kal, shiid mara, shiid moongfo, Lahaati, Haang, Araar, Ufteey, Tiif, Doolaab, Maghaar, Masalli megged e’, dhar/kar ii wali kale oo dadba ki dhaghamaaw. Madoo bershee baathiitha dootha gala korte. Hoo baathi reer horaang iniing lahaayne ki daayto doothaa sheenokorte hoo qofka Ilaaheey ungu obsothaane. Maaybaa la arreey baathi kii daayti wal atha letaa is taawiyaase. Guud ahaang dhaghanky Soomaalithy may ky saleeysinyaa inii qofky wal usu ho ring lahaayi luku hathi omboo ku dhumeen hooby aragho inii horleey ku qaathithaaw hoo dad I hooly eyiing hor ku wedethaaw.

Diyaaring: Omar Abdulqadir Sheikh Abdurahman



Fasiraad: Abdullahi Sheikh Mohamed

Dhaghang (Kultur): Dalaga beeroo

Tub/Abuul sising

Diyaaring: Abdullahi Sheikh Mohamed

Dhaghangky Koofur Galbeed may ku ahaa taabashathy sisingty. Sisingty maddii hora mayleey la apuuri jireey maddi roob bathang kooyo oo beeroo gohaang. May la arraayeeey dhaayaa li saaree beerty gootheey oo li ma'ana ety sisingaa liki apuuree. Laaking waqtiyaaghuung dambe faslakastuba la apuuree may weeli beesi faylee liky gathethee. Sisingty may ku mid etaa dalaghee li dhoofiyaaw oo beeso ama la'ag athag luku helaaw ing bathangny waddanky guthaasheeyaa liki istimaalee

**Wargiling:**

Dooqaadky Hoghol maaybaa ha dhawaayeeey walaaghii taly ii fikirid ky saabsing hormariyoky Afky-Maayky: Haniikily hariir: Qofkii haayo, qoraaly, taariikdy, suugaanty Afky-Maayky, haniingky dir:

Email. afmaaydevelopmentcenter@gmail.com

Goobty Horumriyowky Afky- Maayky - Afmaay Development Center (ADC)

c/o Sydvästsomaliska Riksförbundet I Sverige

Föreningarnas Hus

Slottsgatan 13A, 70361Örebro, Sverige

Tel. 019-133110

Manhaj Jangjeero

Manaahijta Walbarashootha Dowladda Federaalky mi dheellitiring.

1- Buugaagty Mahaa tirileey ky qoronyiing

2- Gopolee koofureed afshoo, taariigdiyoo iyo Dhaghanshoo ku moqonyiing buugty taariikdy iyoonaay haang af Soomaalighy ad-daala dorruwaa hal sahooy

AMDC